

Istaraatiijiyada looga hortagayo cunsuriyadda ee Victoria 2024 ilaa 2029

MARKA LA EEGO

Istaraatiijiyada dowlada ee ka dhanka ah cunsuriyadda ee ugu horraysa waa **qorshe 5 sano ah oo lagu joojinayo cunsuriyadda iyo takoorka** ka dhex jira Dawlad Goboleedka Victoria.

Markaan si wadajir ah u shaqeyno, waxaan dhisi karnaa Victoria cadaalad ah, amnina leh oo uu qof walbaa dareemayo inuu qeyb ka yahay bulshada.

Waa maxay cunsuriyad?

Cunsuriyadu waa nooc ka mid ah takoorka taas oo dadka loola dhaqmo si aan cadaalad ahayn sababo la xiriira midabkooda ama isirkooda. Waxaa ka mid ah aflagaado, kala saarid ama in aan qofka la siin fursad la mid ah tan dadka kale ay heleen.

Cunsurinimadu waxay isu soo bandhigi kartaa siyaabo badan. Istaraatiijiyadani waxay diiradda saaraysaa sidii wax looga qaban lahaa cunsuriyadda ka dhex jirta:

- bulshada
- ururada iyo hay'adaha
- sharciyada, siyaasadaha iyo nidaamyada.

Aragtideena

Victoria xor ka ah midab-takoorka iyo cunsuriyada, oo ay dhammaan dadka reer Victoria helayaan xuquuq siman, xorriyad iyo in la xaq-dhowro, ayna ku dhex kobcaan bulsho amni leh, caafimaad qabta isla markaasna is taageerta.

Istaraatiijiyadu waxay leedahay 4 hadaf oo lagu dhimayo midab-takoorka iyo cunsuriyada Victoria:



Hadafka Koowaad.

Dabeecadaha cunsurinimada, dhaqamada iyo caqiidooyinka cunsuriyadda in la ogaado, laga hortago isla markaasna la diido.



Hadafka Labaad.

Adeegyada dawladda iyo goobaha shaqadu waa inay noqdaan meelo amaan ah, oo loo wada siman yahay isla mar ahaantaasna aan wax takoor ah ka jirin



Hadafka Saddexaad.

Cunsuriyada iyo takoorkuinaysan caqabad kusii ahaan ka-qaybgelida, horumarka, badbaadada iyo guulaha dhamaan qaybaha noloshu oo dhan



Hadafka Afaraad.

Dadka lagu sameeyo midab-takoorka waxay heli doonaan adeegyo dhaqan ahaan badbaado leh iyo taageero

Sidii aan ku gaari lahayn aragtideena

Istaraatiijiyadda loogaga hortagayo cunsuriyadda waxay:



soo bandhigi doontaa olole gobolka oo dhan laga dhaqangelinayo si wax looga qabto cunsuriyadda ka jirta **isboortiga bulshada**



taageero **facil ay bulshadu hogaamiso** si looga hortago cunsuriyadda heerka deegaanka



xoojin doontaa **xaq-dhowrka iyo sharciyada** ka dhanka ah hadalada iyo dhaqanka nacaybka leh



wanaajin doontaa habka ay ururada kormeera cabashooyinka **uga falceliyaan warbixinnada cunsuriyadda**



yarayn doontaa midab-takoorka iyo cunsuriyada **ka jirta xakamaynta**



wanaajin doontaa sida **ay mulkiilayaasha loo shaqeeyo iyo ururadu** uga hor tagaan ugana falceliyaan cunsuriyada



xoojin doontaa **shabakadaha taageerada cunsuriyadda deegaank** ee loogu talagalay dadka la kulmay cunsuriyadda.

Waxaan cabbiri doonaa saamaynta istaraatiijiyadu ku leedahay dhimista cunsuriyadda isla mar ahaantaasna waxaan bulshada la wadaagi doonaa horumarkayaga.

Sababta aan ugu baahanahay Istaraatiijiyadaan

Dadka ku nool Victoria waxay ka kala yimaadeen in ka badan




300 oo abtirsiiyo kala duwan ah



waxayna ku hadlaan **290 luuqadood iyo lahjado**



waxay ku dhaqmaan ku dhawaad **200 oo diimo kala duwan ah**



30%dadka Victoria ku nool waxay ku dhasheen dalka dibadiisa



8%dadka ka soo jeeda Qowmiyadihii ugu Horeeyay ee Australia waxay ku nool yihiin Victoria



Dadka aan la hadalnay

Waxaan waraysanay in ka badan **670 qof oo reer Victoria ah kuwaas oo ka soo jeeda Qowmiyada Koowaad, bulshooyinka dhaqamada iyo bulshooyinka leh diimaha kala duwan** Kuwaas waxaa ka mid ahaa hoggaamiyayaasha bulshada, khubarada iyo shaqaalaha safka hore.

Sannadkii 2022, **3 ka mid ah 5tii Qof ee ah Qowmiyadihii ugu Horeeyay (60%)** ayaa sheegay inay la kulmaan cunsurinimo ka jirta gudaha Australia



Sannadkii 2023, **1 qof oo ka mid ah 5tii qof (18%)** ayaa sheegay inay la kulmeen cunsurinimo ka jirta gudaha Australia



Xog badan oo aanan laga heyn iyo kalsooni badan oo aysan bulshadu ku qabin adeegyada waxay ka dhigan tahay in cunsuriyadda aan si dhameystiran loo soo gudbin.

3 ka mid ah 5-tii qof ee Australiyaan ah (63%) ayaa ka qaba **aragti togan soogalootiga ka yimid** Aasiya, Afrika ama Bariga Dhexe ama aaminsan in diinta aan Masiixiga ahayn ay ka qabaan aragtiyo aan wanaagsaneyn.



3 ka mid ah 5-tii qof ee Australiyaan ah (62%) waxay cunsuriyadda u arkaan **dhibaato 'aad u weyn'**



In la soo sheego cunsuriyadda ka jirta Victoria

Dadku maaha inay u dulqaataan cunsuriyadda. Haddii aad la kulanto ama aad marqaati ka noqoto cunsuriyad ama takoor ka dhacay Victoria, waad soo sheegi kartaa.

Fursadaha Loo Siman Yahay ee Victoria iyo Guddiga Xuquuqul Insaanka (Victorian Equal Opportunity and Human Rights Commission)

Wac 1300 292 153 maalmaha shaqada laga bilaabo 10-ka subaxnimo ilaa 2-da galabnimo. Haddii aad u baahan tahay turjubaan lacag la'aan ah, wac 1300 152 494.

limayl ku soo dir enquiries@veohrc.vic.gov.au

Ka samee [warbixin aan toos ahayn online ka](https://www.humanrights.vic.gov.au/get-help/community-reporting-tool/) <<https://www.humanrights.vic.gov.au/get-help/community-reporting-tool/>>.

[La xiriir Adeegga Gudbinta Qaranka \(National Relay Service\)](https://www.humanrights.vic.gov.au/get-help/contact-us/) <<https://www.humanrights.vic.gov.au/get-help/contact-us/>>.

Si aad u hesho taageero dheeraad ah iyo siyaabo kala duwan oo aad warbixinta noogu soo gudbin karto, fadlan booqo [xeeladda ka-hortagga cunsuriyadda ee Victoria](https://vic.gov.au/victorias-anti-racism-strategy) website kooda <<https://vic.gov.au/victorias-anti-racism-strategy>>



Booliiska Victoria

Wixii xaalad degdeg ah, si aad usoo sheegto fal-dambiyeed markaas dhacaya, ama aad doonayso in booliisku si degdeg ah usoo gaaraan goobta, wac lambarka Saddexda Ebar (000).

Wixii aan degdeg ahayn, wac Khadka Caawimada Booliiska 131 444 ama wac 131 450 si aad u hesho turjubaan lacag la'aan ah.

Waxaad warbixin ka samayn kartaa saldhiga booliiska deegaankaaga ama [online ka](https://www.police.vic.gov.au/police-assistance-line-and-online-reporting) <<https://www.police.vic.gov.au/police-assistance-line-and-online-reporting>>.

Waxaad si qarsoodi ah xogta ula soo wadaagi kartaa Dembi-joojiyayaasha (Crime Stoppers) adoo soo wacaya 1800 333 000 ama <www.crimestoppers.com.au>.

Macluumaad dheeraad ah

Waxaad ka akhriin kartaa istiraatiijiyadda oo dhameystiran ama qoraalkan kooban oo lagu fasiray luqado badan [online ka](https://vic.gov.au/victorias-anti-racism-strategy) <<https://vic.gov.au/victorias-anti-racism-strategy>>.

Waxaad sidoo kale ka wici kartaa Adeegga Fasiraada iyo Turjumaada (Translating and Interpreting Service - TIS) 131 450 sidoo kalena ka wac Waaxda Madax-Goboleedka (Premier) iyo Golaha 03 9651 5111 wixii macluumaad dheeraad ah, ama email u dir [Waaxda Madax-Goboleedka \(Premier\) iyo Golaha](mailto:antiracism.strategy@dpc.vic.gov.au) <antiracism.strategy@dpc.vic.gov.au>

Waxaa oggolaaday oo daabacay Dowladda Victoria, 1 Treasury Place, Melbourne.

© Gobolka Victoria, Australia, Waaxda Maamulaha Gobolka (Premier) iyo Golaha Wasiirada, Nofeembar 2024.

ISBN 978-1-923294-20-2 (online/PDF/Word) ama (daabac)

Waxaa laga heli karaa [istiraatiijiyadda loogaga hortagayo cunsuriyadda ee Victoria 2024 ilaa 2029](https://vic.gov.au/victorias-anti-racism-strategy)

<<https://vic.gov.au/victorias-anti-racism-strategy>>

Waxaa lagu daabacay galinta magaca shirkadda daabacaadda, xaafadda (geli lambarka shaqada nashqad ee biraha)